Caawinta Dadka (Supporting People)
Cida aan nahay iyo waxa aan qabano.

Maxay tahay qabtan lagu magacaabo Caawinta Dadka?
Maalin kasta waxaa jira dad kamid ah bulshada oo caawin u baahan. Waxaa dhici karaysa inay shaqo u baahan yihiin lakiin aysan garanayn jidka ugu fiican ee shaqo loo helo. Ama waxaa dhici karaysa inay iska bixin waayeen ijaarka guriga oy markaas ka walaacsan yihiin in guriga laga saaro.

Kawnsalka ingey iyo dadka kale oo isu tagay waxay diyaar u yihiin inay dadka noocaas ah iyo kuwa kalaba ay gacan siiyaan. Kuwan caawiyayaashu waa Qaybta Caafimaadka ingey iyo Adeega Tijaabada London .

Magaca loo bixiyay qaybta waa Caawinta Dadka (Supporting People). Haddii ay dhibaato ku haysato amaba aad taqaanid qof ay dhibaato haysato, arkhri qodobada hoos ku qoran si aad u ogaatid inaan caawin karno.

Maxay tahay caawinta ay qaybta Caawinta Dadku soo gudbiso?
Waxaan gacan kaa siin karnaa arimahan dhibka badan ee hoos ku xusan:

- Haddii aad u baahan tahay helista guri aad ku noolaatid amaba aad guri samaysatid.
- Waxaa dhici karaysa inaad qabtid walaac ijaarka guriga oodan iska bixin darteed. Ood walaac ka qabtid in guriga lagaa saaro.
- Inaan adigu arimahaaga qabsatid adiga oondan rabin inaad caawin waydiisatid dadka saaxiibadaa ah ama ehelkaaga ah. Waxaad u baahan tahay inaad baratid sida wax loo qabto.
- Waxaa dhici karaysa inaad caawin ooga baahan tahay sidii aad waxbadan ooga ogaan lahayd lacagaha dadku qaataan amba aadan aqoonba sida loo dalbado.
- Waxaad dhici karaysa inaad kaligaa dagan taha. Aadna u baahan tahay inuu qof ku soo booqdo si uu u hobsado inaad bad qantid caafimaadkaaguna wanaagsan yahay.
- Inaad danaynaysid shaqo helis. Aadna la socotid inaad heshid tababar si aad shaqo u heshid.
- Waxaaba dhici karaysa inaadan gurigaaga nabadgaliyo ku dareemaynin ood u baahan tahay in laguugu dhajiyo “ganbaleed” si markaad caawin u baahatid aad u taabatid.

Dadka aan caawino waa dad noocee ah?
Haddii adiga ama qof saaxiibkaaga oo qabo dhibaatooyinkan hoos ku xusan, Kawnsalku waxa uu diyaar u yahay inuu kucaawiyo.

- Haddii aad u baahan tahay meel aad dagtid.
- Haddii aad tahay qof qaba xanuun dhibaatooyinka maskaxda
- Haddii aad tahay qof da’ah oo caawin u baahan.
- Haddii aad caawin ooga baahan tahay barashadada arimo cusub.
- Adiga,saaxiibkaa ama qof saaxiibkaa ah uu qabo cudurka HIV/Aids.

- Haddii aad tahay qof da'yar ah oon lahayn qoys, amab aad dagan tahay meel lagugu daryeelo.
- Dadka sameeyay arimo sciga ka soo horjeeda amaba ilaa iyo hadda sciga kasoo horjeeda.
- Haddii ay dhici karayso in qof kastirsan qoyskiina uu sixun kuula dhaqmay oo uu nabar kugu dhuftay amab uu kugu hanjabay inuu wax xun ku gaadhsiiyo.
- Haddii ay dhici karayso in dadka dariskaaga ahi ay ku af lagaadeeyeen amaba ay kuu hanjabeen inay dhib ku gaadhsiinayaan.
- Amaba inaad qabtid dhibaato la xidhiidha xi xun u isticmaalaka maandooriya iyo khamrida.
- Inaad wadankaagii isaga timid ood rabtid inaad halkan nolo fiican aad ku noolaatid.
- Waalidiinta haysta caruurta da'yarta ah sida caadiga caawin ayay u baahan yihiin.
- Haddii ay dhici karayso inay dhibaato kaahaysato socodka, shaqada guriga qabashada amab aad tahay qof isticmaala kuraasta curyaamiinta.
- Haddii ay dhibaato haagaysato maqalka iyo araga.

Yaa soo gudbiya adeegyadan?
Waxaa jira labo nooc oo caawin ah.

Adeegyo Caawin Socon ah (Floating support services).
Adeegyadan waxaa lagu magac daray Caawin Socota (floating support) Waxaa loogu tala galay dadka meel kasta ha ku noolaadeene, dadka ayagu kaligood nool. Waxaa dhici karaysa iany ku nool yihiin guryo ay ka iraarteen Kawnsalka amaba Iskaashatooyinka Guryaha (Housing Association) amaba ku jira guryo ay hantiilayaal gaar ah ka ijaarteen. Ama dadka ku jira guryo ay ayagu leeyihiin

Adeegyadan Caawinta Socota (Floating support) ayaa ah kuwo bilaash ah. Adiga amba dadka kalaba waa loo soo gudbin karyaa. Haddii aad u baahan tahay inaad laxidhiidha qaybta kawac taleefonadan:

Qoysaska:
(HARTS)
☎: **0845 303 2350**

Dadka da''doodu ka wayn tahay 60:
(Sixty Plus)
☎: 0800 652 6100

Dadka da'doodu u dhaxayso16-59 oon xaas ahayn amab xaas aan caruur lahayn ah:
(Key Support)
☎: **020 8347 2327**

Waxaa jira caawin joogta ah oo loogu tala galay Dadka Laga Tiro Badan Yahay. Si aad waxbadan ooga ogaatid nooca caawinta ay bixiyaan laxidhiidh:

Kooxda Ganacsiga Iskaa Wax u Qabsashada
(The Corporate Voluntary Sector Team)
☎: 020 8489 6913

Kooxda ingey ee Nabadgaliyada iyo Badqabku waxay ku siin karaysaa "ganbaleel" aad guriga ku isticmaashid si markaa arin dag-dag ah oo dhibaato ah ay ku soo gaadho aad u taabatid si caawin laguugu soo gudbiyo.
☎: 020 8489 2365 ama booqo boga intarnedka ee cinwaankiisu yahay www.ingey.gov.uk

Kuwa lagu magacaabo Dayac tirka iyo Daryeelka Xaafada, cida aan caawino waxay diyaar u tahay inay ku caawiso. Ma u baahan tahay in gurigaaga dayac tir laguugu sameeyo. Tusaale ahaan waxaad u baahan tahay in beerta gurigaaga laguug hagaajiyo. Haddii aad tahay qof naafo ah amaba ay dhici karayso in baahiyahaagu guriga dhexdiisu inay isbadalaan. Waxaa kale oy qabtini talo kaa siin sidii aad u noqon lahayn qof ka nabadgala dhibaatooyinka oo bad qaba.
☎: 020 8829 8310

Adeegyada dadka guryaha loogu soo gudbiyo .
Caawinta kale eed heli karaysid waxaa lagu magacaabaa adeegyada loo soo gudbiyo dadka dagan. Tani waxay ka dhigan tahay in caawin laguugu soo gudbiyo adiga oo ku gurigaaga ku sugan. Adeegyadaas qaar kamid ah waxaa dadku heli karaan 24 maalinka iyo maalin kasta oo usbuuca dhexdeesa ah. caawintaas waxaa kamid ah::

- Guryo ladajiyo dadka da'da ah
- Huteelo leh adeegyada caawinta oo ladajiyo dadka aan guryaha haysan, iyo dadka horay fal danbi ah galay iyo dadka ka soo raynaya kadib markii ay sixun u isticmlaaleen maandooriye iyo khamri
- Guyo nabadgaliyo ah oo la dajiyo dadka ay dad qoyskooda ah ay dhibaato ka soo gaadhay.
- Guryaha la caawiyo ee loogu tala galay dadka madaxa ka jiran.
- Guryaha la caawiyo ee loogu tala galay dadka qaba dhibaatooyinka la xidhiidha waxbarashadda
- Guryaha la caawiyo ee loogu tala galay dadka qaba xanuunka maskaxda amaba naafanimo dhinaca jidhka ah. Ama haddii ay dhibaato qofka ka haysato meelaha booqdo amaba uu arimihiisa qabsado.
- Guryaha la caawiyo ee loogu tala galay ee loogu tala galay dadka dhaba dhibaatooyinka maqalka ama araga.
- Caawin tababar oo loogu tala galay dadka da'yarta eel ala dajinayo qoys haya, ama ay dhici karayso inay haystaan qof ay caawiya.

Adiga adeegyadaas iskaa ooma heli karaysid. Waxaad u baahan tahay in qofka ku daryeela ama ku caawiya uu arinkaaga asagu noo soo wareejiyo. Waxay dhici karaysaa in qofkaas ku caawiyo uu yahay qof ka socda Sooshaalka, dhakhtarkaaga ama qof kaacaawiiya dhibaatooyinka

caafimaadka maskaxda. Si aad u heshid faah-faahin dheeraad ah arinkan nagala soo xidhiidh:

✉: (Caawinta Dadka) Supporting People Team, 40 Cumberland Road, N22 7SG
☎: 020 8489-3344
@: supporting. people@ingey.gov.uk

Qaybtan Caawinta Dadku (Supporting People) ma soo gudbiso adeegyadan hoos ku xusan.

Dadka kama caawino arimahan:
- Daryeelka qofka ama caawinta d dhaqaalka ama d xidhashada
- Conto samaynta, adeegya suuqa ama in si joogta ah cunto laguu kariyo
- Daryeelka caruurta
- Daryeelka caafimaadka
- Tala bixiyo gaar ah (inaad qof khabiir ah dhibaatooyinkaaga).

Haddii aad jeceshahay inaad wax badan ka ogaatid sida Qaybta Sooshaalka ee Kawnsalka ingey kuu caawin karto la xidhiidh:
Social Services
☎: 020 8489-0000

Lacag miyaa layga rabaa adeegyadaas la ii soo gubin darteed sideebaanse cabasho u soo gubin karaa?
Haddii aad caawin kuu soo gudbino mudo ka yar 2 sabo, markaas adeegu waa bilaash oo lacag kaagam abaahna. Haddiise ay tahay inaad caawin heshid mudo ka badan labo sano waxaa dhici karaysa inaad markaas lacag ku bixisid adeegyada aan kuu soo gudbino.

Haddiise aad tahay qof uu Kawnsalku ka bixiyo Kirada Guriga, markaas adeegyda laguu soo gudbin waxay noqon bilaash oo adiga lacag lagaagam abaahna.

Marka aad soo codsotid caawin ayaa waxaa laguu sheegi inay tahay inaad bixid kash adeegyada iyo in kale. Waxaa jira qoraal kale oo kuu faah-faahin ku saabsan arinkan iyo sida aad u codsan karaysid adeegyo bilaash ama amaba lacagta ku baxda adeegyada lagaaga dhimo, waxaan aqoraalkaas lagu magacaabaa " Sida loo bixiyo kashka ku kaca adeegyada aan helo?" (How is my Supporting People service paid for). Si laguugu soo diro nuqul qoraalkan ah fadlan lasoo xidhiidh cinwaanka hoos ku xusan.

Haddii aadan ku faraxsanayn adeegyada ay qaybtani kuu soo gudbiso, arinkan la socodsii maareeyaha u qaabisan adeegyadaada. Haddii aadan markaas jawaabaha uu qofkaasi kusiiyo aadan ku qancin laxidhiidh Kooxda Dadka Caawisa. Waxaa jira qoraal kuu faah-faahin waxa aad samayn karaysid haddii aadan nagu raacsanayn go'aanada aan qaadano amab aad jeceshahay inaad soo gudbisid cabasho ku saabsan adeegyadanada, fadlan nala soo xidhiidh si laguugu soo diro nuqul ku saabsan qoraalkaas.

Si aadan arinkan waxbadan ooga ogaatid amaba ay ku haystaan dhibaatooyin kale ood caawin ooga baahan tahay, fadlan nala soo xidhiidh.